Kartläggningsmaterial för nyanlända elever

SOMALISKA

# Uppgifter B Textpaket

## Litteracitet

1 Steg 2 3

## Elever som läser och skriver



Skolverket



# Innehåll

**Inledning** ..... **3**

**Textpaket 1**

Lejonet och räven ..... 5

En karta över en ö ..... 7

Skorpionen ..... 9

**Textpaket 2**

Skorpionen ..... 12

Den giriga mannen ..... 14

Potatischips ..... 16

**Textpaket 3**

Skorpionen ..... 19

Potatischips ..... 21

Sömn ..... 23

Mjölk ..... 25

Världens städer ..... 27

**Litteratur- och bildförteckning** ..... **29**

Skolverket och andra rättighetsinnehavare har upphovsrätt till materialet och delar som ingår i materialet. Materialet får inte mångfaldigas eller sparas på dator i annat syfte än för att genomföra en bedömning av nyanlända elevers kunskaper.



# Inledning

Detta häfte innehåller underlag för *Uppgifter B – Textpaket*. Uppgifterna använder du tillsammans med *Samtals- och dokumentationsunderlag B* och *Bedömningsunderlag för Uppgifter B*.

Instruktionerna för hur du genomför uppgifterna finns i *Samtals- och dokumentationsunderlag B*.

Dokumentera elevens svar på uppgifterna i bedömningsunderlagen. Var uppmärksam på att svarsrutorna för ”Ja” och ”Nej” kommer i en annan ordning på elevens svarsblad när språket har läsriktningen höger–vänster.

Varje uppgift består av två blad – en text och elevens svarsblad med läsförståelsefrågor. Information om hur du väljer uppgifter till eleven finns i lärarhandledningen (se s. 6–7). Skriv ut uppgifterna i färg och enkelsidigt så att eleven kan se texten och frågorna samtidigt.

Ge gärna tolken kopior av uppgifterna du har valt, både på svenska och på elevens språk.

## Om översättningen

Översättningen använder det i Somalia enligt lag vedertagna standardspråket. Observera dock att somalisk stavning inte är standardiserad fullt ut. Du bör alltså vara uppmärksam på att eleven och/eller tolken kan vara bekant med en annan stavning av enstaka ord.

## Anpassning av uppgifter för elever med funktionsnedsättning

Om du läser upp eller spelar in uppgifter för elever med svår synnedsättning behöver du anpassa uppgifter som innehåller bilder eller figurer. Kontakta en speciallärare eller specialpedagog om det behövs.

### Textpaket 1

- Text 1. Lejonet och räven. Beskriv innehållet i bilden.
- Text 2. En karta över en ö. Uppgiften stryks.
- Text 3. Skorpionen. Beskriv skorpionen i bilden. (Ingår även i textpaket 2 och 3)

### Textpaket 2

- Text 3. Potatischips. Använd riktiga potatischips. (Ingår även i textpaket 3)

### Textpaket 3

- Text 3. Sömn. Figuren kan strykas. Frågorna 3 och 4 som bygger på information i figuren stryks.
- Text 5. Världens städer. Diagrammet kan strykas. Frågorna 2 och 4 som bygger på information i diagrammet stryks.

Läs mer i *Anpassning för elever med funktionsnedsättning.*

# Textpaket 1



# Libaaxa iyo dawacada

Libaaxu wuxuu jiifay godkiisii.
Habeen iyo maalinba halkaasuu jiifay.
Gurxan yar oo daalan uun baa laga maqlayey.
– Wuu xanuunsan yahay, ayey bahalladu ku fikireen oo way u naxeen.
Waxey bilaabeen inay libaaxa godkiisa hadiyado yaryar ugu dhex geeyaan.

Dawacaduse godka ma gelin.
Libaaxii ayaa cod yar oo macaan ku weydiiyey:
– Saaxiib, maxaad iigu soo geli wayday? Bahalladii kaleba kulligood wey ii yimaadeene.

– Waan rabey inaan imaado, ayay tiri dawacadii, laakiin raadadka markaan arkay ayaan baqay. Raadadka oo dhan godkaaga ayey galayaan, laakiin wax raad ah oo godka ka soo baxa lama arko. Sidaa darteed bannaanka ayaan iska joogi.





K. Aronsson & S. Ottosson, *Min läsebok.* 1993. Bearbetad. Bild: I-K. Eriksson.

# Su'aalaha ”Libaaxa iyo dawacada”

**Haa ama Maya kaga jawaab su'aalaha soo socda.**

| | | Haa | Maya |
|---|---|---|---|
| **1.** | Libaaxa ma godkiisa ayuu wakhti kasta joogay? | ☐ | ☐ |
| **2.** | Dawacadu ma u gashay libaaxa? | ☐ | ☐ |
| **3.** | Dawacadu ma siisay libaaxa hadiyado? | ☐ | ☐ |
| **4.** | Libaaxu ma cunay bahalladii kale? | ☐ | ☐ |

**Su'aalahaan afka ayaad uga jawaabeysaa.**


**5.** Iskaaga si kooban ma uga sheekeyn kartaa wuxuu qoraalkaanu ku saabsan yahay?

**6.** Ma u maleyneysaa inuu libaaxu xanuunsanaa? Fikraddaada ma sharxi kartaa?

**7.** Dawacadu ma ka caqli badnayd bahallada kale? Fikraddaada ma sharxi kartaa?

**8.** Ma u maleyneysaa in sheekadaan wax laga baran karo? Fikraddaada ma sharxi kartaa?

# Khariidad jasiirad






Anpassad med tillstånd från IEA. © 1990.

## Su'aalaha "Khariidadda"

**Istallaab ku dhifo qaanadda ku aaddan jawaabta aad u aragto inay sax tahay. Hal istallaab uun baa la oggol yahay.**

**1. Dekadda goobtee ayaa goobaha kale uga dhow?**

A ☐ Magaalada
B ☐ Balliga
C ☐ Beerta

**2. Magaalada goobtee ayaa waqooyi ka xigta?**

A ☐ Garoonka dayuuradaha
B ☐ Duurka
C ☐ Beerta

**3. Haddii aad magaalada ka baxdo oo aad balliga ku socoto jahadee ayaad aadeysaa?**

A ☐ Woqooyi
B ☐ Galbeed
C ☐ Bari

**4. Ku fikir inaad jasiiradda lug ku mareyso. Raac tilmaantaan.**

1. Ka bilaw tuulada.
2. Raac waddada u jeedda dekadda.
3. Bidix uga leexo isgoyska labaad.
4. Sii soco ilaa waddadu ay ka dhamaanayso.
5. Hadda xageed joogtaa?

A ☐ Beerta
B ☐ Magaalada
C ☐ Dekadda

# Dibqallooc – bahal caaro ah oo dabada mudac ku leh

Fikir wanaagsan maahan in marka dalalka kulul la joogo faraha la geliyo daldaloollada yaryar ee derbiyada ama dhagxaanta dhexdooda ah. Waa in misna kabaha la iska hurgufo hadday muddo dheer meel iska yaaleen. Waxaa dhici karta in bahallo galeen. Waayo dibqalloocyadu ma jecla iftiinka oo waxay maalintii galaan oo ku dhuuntaan daldalloolada yaryar iyo meelaha kale ee mugdiga ah. Dibqalloocyadu waxay ku nool yihiin dalalka kulul ee adduunka oo dhan, hase yeeshee inta badan lama arko.

**Mudaciisa ayuu ku dila noolaha uu qabsado**
Dibqalloocyadu waxay dhab ahaantii noqon karaan kuwo sun badan leh, xitaa haddii sinjiyada badankood aaney dadka dilin. Wuxuu dhererkoodu gaaraa inta u dhexeysa hal illaa iyo labaatan sentiimitir taasoo inta badan ku xiran sinjiga ay yihiin, laakiin kulligood waxey dabada meeshay ku dhammaato ku leeyihiin mudac sun ah. Markuu dibqalloocu dilayo noolaha uu qabsado, dabadiisa ayuu kor dhabarka dushiisa ugu soo laabaa oo ku mudaa noolaha uu cidiyaha ku qabsaday. Dibqallooca cabsanaya si dhaqso leh ayuu isku kala rogaa si uu mudaciisa ugu aaddiyo cadowga.

Dibqalloocyadu habeenkii ayey ugaarsadaan caarooyinka waaweyn iyo cayayaan kale oo yaryar. Cidiyahooda ayey wax ku raadsadaan, kuna dhegaan noolaha ay qabsadeen oo caaraddooda sumeysan ku dilaan.



*Dibqallooc*


K. Åström, *Boken om världen.* 2001. Fotografi Wikimedia Commons.

## Su'aalaha "Dibqallooca"

**Haa ama Maya kaga jawaab su'aalaha soo socda.**

| | | Haa | Maya |
|---|---|---|---|
| **1.** | Dibqalloocyadu ma jecel yihiin mugdiga? | ☐ | ☐ |
| **2.** | Dibqalloocyada *kulligood* ma dili karaan dadka? | ☐ | ☐ |
| **3.** | Dibqalloocyada kulligood ma isku wada cabbir baa? | ☐ | ☐ |
| **4.** | Dibqalloocu ma cidiyaha ayuu noolaha ku qabsadaa? | ☐ | ☐ |

**Su'aalahaan afka ayaad uga jawaabeysaa.**

**5.** Iskaaga si kooban ma uga sheekeyn kartaa wuxuu qoraalkaanu ku saabsan yahay?

**6.** Qoraalka ku saabsan dibqallooca waxaa ku taal in kabaha la iska hurgufo. Maxay kula tahay sababta middaa loo sameynayo? Fikraddaada ma sharxi kartaa?

# Textpaket 2



# Dibqallooc – bahal caaro ah oo dabada mudac ku leh

Fikir wanaagsan maahan in marka dalalka kulul la joogo faraha la geliyo daldaloollada yaryar ee derbiyada ama dhagxaanta dhexdooda ah. Waa in misna kabaha la iska hurgufo hadday muddo dheer meel iska yaaleen. Waxaa dhici karta in bahallo galeen. Waayo dibqalloocyadu ma jecla iftiinka oo waxay maalintii galaan oo ku dhuuntaan daldalloolada yaryar iyo meelaha kale ee mugdiga ah. Dibqalloocyadu waxay ku nool yihiin dalalka kulul ee adduunka oo dhan, hase yeeshee inta badan lama arko.

**Mudaciisa ayuu ku dila noolaha uu qabsado**
Dibqalloocyadu waxay dhab ahaantii noqon karaan kuwo sun badan leh, xitaa haddii sinjiyada badankood aaney dadka dilin. Wuxuu dhererkoodu gaaraa inta u dhexeysa hal illaa iyo labaatan sentiimitir taasoo inta badan ku xiran sinjiga ay yihiin, laakiin kulligood waxey dabada meeshay ku dhammaato ku leeyihiin mudac sun ah. Markuu dibqalloocu dilayo noolaha uu qabsado, dabadiisa ayuu kor dhabarka dushiisa ugu soo laabaa oo ku mudaa noolaha uu cidiyaha ku qabsaday. Dibqallooca cabsanaya si dhaqso leh ayuu isku kala rogaa si uu mudaciisa ugu aaddiyo cadowga.

Dibqalloocyadu habeenkii ayey ugaarsadaan caarooyinka waaweyn iyo cayayaan kale oo yaryar. Cidiyahooda ayey wax ku raadsadaan, kuna dhegaan noolaha ay qabsadeen oo caaraddooda sumeysan ku dilaan.



*Dibqallooc*



K. Åström, *Boken om världen.* 2001. Fotografi Wikimedia Commons.

## Su’aalaha ”Dibqallooca”

**Haa ama Maya kaga jawaab su’aalaha soo socda.**

| | | Haa | Maya |
|---|---|---|---|
| **1.** | Dibqalloocyadu ma jecel yihiin mugdiga? | ☐ | ☐ |
| **2.** | Dibqalloocyada *kulligood* ma dili karaan dadka? | ☐ | ☐ |
| **3.** | Dibqalloocyada kulligood ma isku wada cabbir baa? | ☐ | ☐ |
| **4.** | Dibqalloocu ma cidiyaha ayuu noolaha ku qabsadaa? | ☐ | ☐ |

**Su’aalahaan afka ayaad uga jawaabeysaa.**

**5.** Iskaaga si kooban ma uga sheekeyn kartaa wuxuu qoraalkaanu ku saabsan yahay?

**6.** Qoraalka ku saabsan dibqallooca waxaa ku taal in kabaha la iska hurgufo. Maxay kula tahay sababta middaa loo sameynayo? Fikraddaada ma sharxi kartaa?

# Ninkii bakhaylka ahaa

Nin bakhayl ah ayaa iska iibiyey wuxuu lahaa oo dhan, lacagtii dahabka ahayd ee uu halkaa ka helayna intuu isku dhalaaliyey ayay kuus weyn u noqotay. Kuuska dahabka ah wuxuu ku duugay geed beertiisa ku yiiley hoostiisa. Maalin walba geedka ayuu hoos tagi jiray. Maalin maalmaha ka mid ah ayuu mid ka mid ah deriskiisu arkay oo xaaladdiisa markiiba fahmay. Bakhaylku markuu geedkii ka tagay ayuu deriskii ka faa'iideystay oo intuu dhulkii faagay uu kala baxay kuuskii dahabka ahaa ka qaatay.

Maalintii dambe markuu bakhaylkii u yimid inuu hantidiisii eegto, god maran uun buu ka war helay. Markaasuu qalqalay oo oohin la dhacay. Saaxiibkii oo jidka markaa maraya ayaa la yaabay oo is weydiiyay waxa meesha ka dhacay. Bakhaylkii baa uga waramay tan qabsatay.

– Oo ma intaa uun bey ahayd, ayuu yiri saaxiibku, haddee wax aad la murugootaa meeshaan ma jiraan. Waayo dahabku runtii wax aad dhab ahaan u lahayd ma ahayn weligii. Dhagax qaad oo beddelkiisa godka geli oo iska dhaadhici inuu kuuskii dahabka ahaa uu yahay! Farxad iyo faa'iido la mid ah ayaad ku qabi doontaaye.



Efter Aisopos. Bearbetad och översatt från svenska.

# Su'aalaha ”Bakhaylka”

**Istallaab ku dhufo qaanadda ku aaddan jawaabta aad u aragto inay sax tahay.**
**Hal istallaab un baa laguu oggol yahay.**

**1. Sidee buu ninka bakhaylka ah ku helay kuuska dahabka?**

A ☐ Deriska ayuu ka iibsaday.
B ☐ Lacag ayuu ka samaystay.
C ☐ Beerta ayuu ka helay.

**2. Maxay ahayd sababta uu bakhaylka maalin walba geedka u hoos tagi jiray?**

A ☐ Si uu dahab kale halkaa ugu duugo.
B ☐ Si uu dahabkiisa halkaa uga faagto.
C ☐ Si uu dahabkiisa u ilaashado.

**3. Maxaa sheekada laga baran karaa?**

A ☐ In hantida dadka lala qeybsado.
B ☐ In hantida la isticmaalayo uun ay faa'iido leedahay.
C ☐ In had iyo jeer deriska iyo asxaabta hadalkooda la raaco.

**Su'aalahaan afka ayaad uga jawaabeysaa.**

4. Iskaaga si kooban ma uga sheekeyn kartaa wuxuu qoraalkaanu ku saabsan yahay?

5. Maxay kula tahay sababta uu bakhaylku u iibiyey wuxuu lahaa oo dhan? Fikraddaada ma sharxi kartaa?

6. Maxaa ugu wacnaa fikradda saaxiibka ee ahayd dhagax godka lagu duugo in aysan waxba dhaamin dahab halkaa ku jira? Fikraddaada ma sharxi kartaa?

# Baradho shiilan (Chips)


*Jibis baradho*

Jibis baradho waa xalleefyo dhuudhuuban oo shiilan oo baradho ka sameysan oo ka mid ah hindisooyinka qarnigii 18-aad sida aadka ah looga hadlay. Wey badan yihiin qisooyinka ku saabsan cidda hindistay ee billowday inay iibiso xalleefyadaas, oo ilaa iyo heer way adag tahay in laga salgaaro in qisooyinkaas ay wax uun ka run yihiin iyo in kale.

Qisada ugu baahsan waxay ku saabsan tahay cunto-kariyaha George Crum. Taariikhdu mar ay ahayd 24/8 1853 ayuu Crum isku dayay inuu raali-geliyo macaamiil aan qanacsanayn. Wuxuu jarjaray oo shiilay xalleefyo baradho ah oo dhuudhuuban, maxsuulkii halkaa ka soo baxayna cusbo ayuu ku dul shubay, taasoo dhalisay in macaamiishii ey heerkii qanacsanaan-la'aanta ey iska beddelaan oo ey gaaraan heer qanacsanaan buuxda ah. Qisadaan waxay u badan tahay inay tahay mid run ah, hase yeeshee waxaa sidoo kale cad in isla qarnigaas gudihiisa ey fikrado taa la mid ah ey maskaxyadooda ku soo dhaceen cunto-kariyeyaal kale. USA oo keliya ayaa noocyo baradhadaas la mid ah lagu soo hadal-qaaday dhawr buug oo cunto-karin ah, noocyo kalena Boqortooyada Ingriiska ayaa laga soo saaray.

1890-meeyadii ayaa ugu horreysay in la billaabo in jibiska dukaammada raashinka lagu iibiyo, soo saarkiisa iyo iibkiisa inuu rasmi ahaan u kordhana waxay billaabatay markii la hindisay mashiinka gaarka ah ee wax lagu shiilo, ee fududeeyey sameyntiisa, dabayaaqadii 1920-meeyadii. Tobannaankii sannadood ee xigeyna waxaa weliba isbeddelay baakadeyntiisa, taasoo keentay in loo qeybqeybiyo oo loo dhoofiyo dhulal kala fog ee dalkaasi USA. Yurub xaggeeda waxay ku fididda jibisku uu ka habaamay in lagu iibiyo dukaammada illaa iyo sannadihii 1950-meeyadii.



D. Harrison, Historiebloggen. www.svd.se (publicerad 2014-09-28) Bearbetad. Fotografi Pixabay.

# Su'aalaha "Jibiska baradhada"

**Istallaab ku dhufo qaanadda ku aaddan jawaabta aad u aragto inay sax tahay. Hal istallaab uun baa laguu oggol yahay.**

**1. Maxay ahayd sababta qoraagu uu u qoray qoraalkan?**

A ☐ Si uu akhristaha uga warbixiyo taariikhda jibiska baradhada.
B ☐ Si uu akhristaha ugu maaweeliyo qiso maad ah.
C ☐ Si uu akhristaha tilmaan uga siiyo sida loo sameeyo jibiska baradhada.

**2. Miyaa la garanayaa cidda hindistay jibiska baradhada?**

A ☐ Haa, wuxuu ahaa George Crum.
B ☐ Maya, waxaa jira dhawr qof oo la maleyn karo.
C ☐ Maya, laakiin waxaa la og yahay *meesha* lagu hindisay.

**Weerahee ayaa waafaqsan waxyaalaha ku yaal qoraalka jibiska baradhada? Hal istallaab ah ku dhufo qaanadda ku aaddan Haa ama Maya ee weer walba dhammaadkeeda.**

| | | Haa | Maya |
|---|---|---|---|
| **3.** | Qiyaas ahaan waan u garaneynaa muddada la cunayey jibiska baradhada. | ☐ | ☐ |
| **4.** | Yurub waxay ahayd qaaradda ugu horeysa ee lagu iibiyo jibiska baradhada. | ☐ | ☐ |
| **5.** | Waxaa jira sababo dhowr ah ee kallifay in jibiska baradhada cuniddiisa la billaabo qarnigii 19-aad. | ☐ | ☐ |

**Su'aashaan afka ayaad uga jawaabeysaa.**

**6.** Iskaaga si kooban ma uga sheekeyn kartaa wuxuu qoraalkaanu ku saabsan yahay?

# Textpaket 3



# Dibqallooc – bahal caaro ah oo dabada mudac ku leh

Fikir wanaagsan maahan in marka dalalka kulul la joogo faraha la geliyo daldaloollada yaryar ee derbiyada ama dhagxaanta dhexdooda ah. Waa in misna kabaha la iska hurgufo hadday muddo dheer meel iska yaaleen. Waxaa dhici karta in bahallo galeen. Waayo dibqalloocyadu ma jecla iftiinka oo waxay maalintii galaan oo ku dhuuntaan daldalloolada yaryar iyo meelaha kale ee mugdiga ah. Dibqalloocyadu waxay ku nool yihiin dalalka kulul ee adduunka oo dhan, hase yeeshee inta badan lama arko.

**Mudaciisa ayuu ku dila noolaha uu qabsado**
Dibqalloocyadu waxay dhab ahaantii noqon karaan kuwo sun badan leh, xitaa haddii sinjiyada badankood aaney dadka dilin. Wuxuu dhererkoodu gaaraa inta u dhexeysa hal illaa iyo labaatan sentiimitir taasoo inta badan ku xiran sinjiga ay yihiin, laakiin kulligood waxey dabada meeshay ku dhammaato ku leeyihiin mudac sun ah. Markuu dibqalloocu dilayo noolaha uu qabsado, dabadiisa ayuu kor dhabarka dushiisa ugu soo laabaa oo ku mudaa noolaha uu cidiyaha ku qabsaday. Dibqallooca cabsanaya si dhaqso leh ayuu isku kala rogaa si uu mudaciisa ugu aaddiyo cadowga.

Dibqalloocyadu habeenkii ayey ugaarsadaan caarooyinka waaweyn iyo cayayaan kale oo yaryar. Cidiyahooda ayey wax ku raadsadaan, kuna dhegaan noolaha ay qabsadeen oo caaraddooda sumeysan ku dilaan.



*Dibqallooc*



K. Åström, *Boken om världen.* 2001. Fotografi Wikimedia Commons.

## Su’aalaha ”Dibqallooca”

**Haa ama Maya kaga jawaab su’aalaha soo socda.**

| | | Haa | Maya |
|---|---|---|---|
| **1.** | Dibqalloocyadu ma jecel yihiin mugdiga? | | |
| **2.** | Dibqalloocyada *kulligood* ma dili karaan dadka? | | |
| **3.** | Dibqalloocyada kulligood ma isku wada cabbir baa? | | |
| **4.** | Dibqalloocu ma cidiyaha ayuu noolaha ku qabsadaa? | | |

**Su’aalahaan afka ayaad uga jawaabeysaa.**

**5.** Iskaaga si kooban ma uga sheekeyn kartaa wuxuu qoraalkaanu ku saabsan yahay?

**6.** Qoraalka ku saabsan dibqallooca waxaa ku taal in kabaha la iska hurgufo. Maxay kula tahay sababta middaa loo sameynayo? Fikraddaada ma sharxi kartaa?

# Baradho shiilan (Chips)



*Jibis baradho*

Jibis baradho waa xalleefyo dhuudhuuban oo shiilan oo baradho ka sameysan oo ka mid ah hindisooyinka qarnigii 18-aad sida aadka ah looga hadlay. Wey badan yihiin qisooyinka ku saabsan cidda hindistay ee billowday inay iibiso xalleefyadaas, oo ilaa iyo heer way adag tahay in laga salgaaro in qisooyinkaas ay wax uun ka run yihiin iyo in kale.

Qisada ugu baahsan waxay ku saabsan tahay cunto-kariyaha George Crum. Taariikhdu mar ay ahayd 24/8 1853 ayuu Crum isku dayay inuu raali-geliyo macaamiil aan qanacsanayn. Wuxuu jarjaray oo shiilay xalleefyo baradho ah oo dhuudhuuban, maxsuulkii halkaa ka soo baxayna cusbo ayuu ku dul shubay, taasoo dhalisay in macaamiishii ey heerkii qanacsanaan-la'aanta ey iska beddelaan oo ey gaaraan heer qanacsanaan buuxda ah. Qisadaan waxay u badan tahay inay tahay mid run ah, hase yeeshee waxaa sidoo kale cad in isla qarnigaas gudihiisa ey fikrado taa la mid ah ey maskaxyadooda ku soo dhaceen cunto-kariyeyaal kale. USA oo keliya ayaa noocyo baradhadaas la mid ah lagu soo hadal-qaaday dhawr buug oo cunto-karin ah, noocyo kalena Boqortooyada Ingriiska ayaa laga soo saaray.

1890-meeyadii ayaa ugu horreysay in la billaabo in jibiska dukaammada raashinka lagu iibiyo, soo saarkiisa iyo iibkiisa inuu rasmi ahaan u kordhana waxay billaabatay markii la hindisay mashiinka gaarka ah ee wax lagu shiilo, ee fududeeyey sameyntiisa, dabayaaqadii 1920-meeyadii. Tobannaankii sannadood ee xigeyna waxaa weliba isbeddelay baakadeyntiisa, taasoo keentay in loo qeybqeybiyo oo loo dhoofiyo dhulal kala fog ee dalkaasi USA. Yurub xaggeeda waxay ku fididda jibisku uu ka habaamay in lagu iibiyo dukaammada illaa iyo sannadihii 1950-meeyadii.



D. Harrison, Historiebloggen. www.svd.se (publicerad 2014-09-28) Bearbetad. Fotografi Pixabay.

# Su'aalaha "Jibiska baradhada"

**Istallaab ku dhufo qaanadda ku aaddan jawaabta aad u aragto inay sax tahay. <u>Hal</u> istallaab uun baa laguu oggol yahay.**

**1. Maxay ahayd sababta qoraagu uu u qoray qoraalkan?**

A ☐ Si uu akhristaha uga warbixiyo taariikhda jibiska baradhada.
B ☐ Si uu akhristaha ugu maaweeliyo qiso maad ah.
C ☐ Si uu akhristaha tilmaan uga siiyo sida loo sameeyo jibiska baradhada.

**2. Miyaa la garanayaa cidda hindistay jibiska baradhada?**

A ☐ Haa, wuxuu ahaa George Crum.
B ☐ Maya, waxaa jira dhawr qof oo la maleyn karo.
C ☐ Maya, laakiin waxaa la og yahay *meesha* lagu hindisay.

**Weerahee ayaa waafaqsan waxyaalaha ku yaal qoraalka jibiska baradhada? <u>Hal</u> istallaab ah ku dhufo qaanadda ku aaddan Haa ama Maya ee weer walba dhammaadkeeda.**

| | | Haa | Maya |
|---|---|---|---|
| **3.** | Qiyaas ahaan waan u garaneynaa muddada la cunayey jibiska baradhada. | ☐ | ☐ |
| **4.** | Yurub waxay ahayd qaaradda ugu horeysa ee lagu iibiyo jibiska baradhada. | ☐ | ☐ |
| **5.** | Waxaa jira sababo dhowr ah ee kallifay in jibiska baradhada cuniddiisa la billaabo qarnigii 19-aad. | ☐ | ☐ |

**Su'aashaan afka ayaad uga jawaabeysaa.**

**6.** Iskaaga si kooban ma uga sheekeyn kartaa wuxuu qoraalkaanu ku saabsan yahay?

# Hurdo

**Hurdo waa wax loo wada baahan yahay, dad iyo duunyaba. Laakiin waayo? Cilmibaarayaasha qudhoodu ma garanayaan taa jawaabteeda. Ama waxa dhaca markaan hurudno. Laakiin inaan hurdo u baahannahay – shaki kuma jiro. Hurdo la'aanteed weynu dhimaneynaa.**


In kasta oo aadan la socon waxa hareerahaaga ka dhacaya, haddana hurdadu waa nooc ka mid ah nasashada. Ilaa iyo xad waxaa la oran karaa waad miyir beeshay markaad huruddo. Laakiin ma ahan heer aan lagaa toosin karin.

### Meertada hurdada

Hurdadu waa meertooyin soo noqnoqda oo qiyaastii uu dhererkoodu yahay 90 daqiiqadood. Meertadiiba waxay ka kooban tahay shan heer, eeg jaantuska meertada hurdada.

### Hurdada riyada iyo hurdada dugta

Heerka shanaad waxaa la yiraahdaa hurdada riyada. Markaa indhaha ayaa aad u dhaqdhaqaaqa, waana marka aan riyooneyno. Hurdada riyada waa mid fudud, micnaha waxaan u hurudnaa si aan sidaa u qoto dheereyn. Hurdada riyadu waa mid soo noqnoqota 90kii daqiiqadoodba mar oo qiyaastii socota xilliga aan hurudno rubucii. Heerka kale waa hurdada dugta. Waa marka uu jirku soo kabsanayo, taas oo inoo sahasha barashada waxyaalaha cusub. Inta lagu jiro hurdada dugta aqoonta ayaa xoog yeelata oo maskaxdeennu si fudud u qabataa.




### Hurdo ka gaarsiin

Haddii aad wakhti dheer soo jeeddo maalin waxaa fudud in la maleeyo inaad habeenka xiga u baahan tahay hurdo labanlaab ah. Laakiin taasi ma ahan wax sax ah. Jirku wuu ku wanaagsan yahay inuu gudo hurdadii dhaaftay. Markay hurdadu kugu yaraato waxaad taa ku gudeysaa hurdo ka qoto dheer tii hore.



H. Borgström, *Kroppens mysterier*. 2010. Bearbetad. Figur G. Wallentin.

# Su'aalaha "Hurdada"

**Weerahee ayaa waafaqsan waxyaalaha ku yaal qoraalka hurdada? Hal istallaab ah ku dhufo qaanadda ku aaddan Haa ama Maya ee weer walba dhammaadkeeda.**

| | | Haa | Maya |
|---|---|---|---|
| **1.** | Cilmibaarayaasha wey garanayaan sababta ay dadku ugu baahan yihiin hurdo. | ☐ | ☐ |
| **2.** | Hurdada riyada waa mid fudud. | ☐ | ☐ |
| **3.** | Habeenkii xilliga aan hurudno intiisa badan waannu riyoonaa. | ☐ | ☐ |
| **4.** | Hurdada riyada inta aanan la gelin ka hor ayaa ka fudud in la is toosiyo marka loo barbardhigo hurdada riyada ka dib. | ☐ | ☐ |

**Dhameystir weedha adigoo istallaab ku dhufanaya qaanadda ku aaddan jawaabta aad u aragto inay sax tahay. Hal istallaab uun baa la isku oggol yahay.**

**5. Hadday hurdadu hal ama laba habeen kugu yaraato…**

A ☐ waxaad u baahan tahay inaad habeenka xiga labanlaabto hurdada si aad tan ku dhaaftay u guddo.

B ☐ wuxuu jirku taa ku gudi karaa inaad habeenka xiga hurdo tan caadiga ah ka qoto dheer aad seexato.

C ☐ waa inaad habeenka xiga xilli hore seexataa si aad u guddo hurdadii ku dhaaftay.

**Su'aashaan afka ayaad uga jawaabeysaa.**

**6.** Iskaaga si kooban ma uga sheekeyn kartaa wuxuu qoraalkaanu ku saabsan yahay?

# Caano

## Warqado wargeys loo diray

Iswiidhan cunno ayaa ardada kulligood dugsiga laga siiyaa, caano ayaana inta badan cunnada lagu cabbaa. Waayadaan dambe waxaa la billaabay in laga doodo inay run ahaantii wanaagsan tahay in caano la cabbo. Halkaan waxaad ka akhrisan kartaa waxa laba qof oo kala duwan ey ka qabaan in dugsiga ardada caano laga siiyo.

1.

### Carruurta dugsiyada biyo ka siiya caanaha beddelkii

**Caano lo'aad in dugsi laga bixiyo ma ahan wax dabiici ah. Bani'aadamkana waa sinjiga keliya ee ifka jooga oo isticmaala sinji kale caanihii.**

**Baaritaan ballaaran** oo laga sameeyey jaamacadda Ubbsaala, oo arbacadii aannu ka akhrisan karnay wargeyska, wuxuu qallibayaa fikradeheenii gaboobay ee aan iska dhaadhicinnay ee ku saabsan faa'iidada caanaha lo'aad. Aqoonyahannadu waxay ogaadeen in qaadashada caanaha badan ay weheliyaan cimri-degdeg iyo lafo-jab badan.

**Cabidda caanaha lo'aad** ma ahan wax dabiici ah amaba wax u wanaagsan bey'adda iyo caafimaadka dadweynaha. Sidaa darteed waxaa la gaaray xilligii aan caanaha lo'aad ka joojin lahayn dugsiyada Iswiidhan oo aan beddelkooda carruurta bari lahayn caado-cabbitaan kale oo bey'addana uga wanaagsan caanaha: taas oo ah in oonka la isaga baabi'iyo biyo.

**Anders Isfenson**
Wakiilka ururka Cun khudradda.

2.

### Caanaha waa mid loo baahan yahay in cunnada dugsiga lagu cabbo

Jawaab ku socota Anders Isfenson

**Anders Isfenson ma doonayo in carruurtu ay dugsiga caano ku cabbaan. Annaga iyo QM waxaynu qabnaa fikrad taas lid ku ah – carruurta dugsiga kulligood wey u qalmaan caano bilaash ah.**

**Caanaha** waxaa ku jira 18 ka mid ah 22-ka maaddooyinka nafaqada ah ee aan maalin walba u baahan nahay taas oo aannu kalsooni weyn ku qabno inay carruurtu nafaqo ku filan dugsiga maalintii ka heleyso. Dalalka cunnadu ay ku yar tahay waxey caanaha dugsigu carruur badan u noqon karaan il nafaqo oo noloshooda muhiim u ah. Taa ka sokow waxaa cilmibaarisyo cusub lagu hayaa in qadada dugsiga aysan lahayn nafaqo ku filan haddii aaney carruurtu helin caano ay ku cabbaan.

**Cilmibaaraha nafaqada** Ulla Rosander oo ka hawlgasha Dugsiga tacliinta sare ee Kristianstad, waxay baartay nafaqada ku jirtay cunno carruur 10-jirro ah laga siinayey saddex dugsi ee magaalo Iswiidhan ku yaala muddo hal toddobaad ah. Dugsiyada waxay lahaayeen dalab qado isku mid ah. Natiijada waxaa laga arkay inay muhiim tahay in carruurtu ay cunnada ku cabbaan caano, siiba carruurta aan cunnada badsan ama aanan ka gaarin in xilliga qadada ay cunaan cunno ku filan. Caanahu waxey carruurta ka kaafiyaan baahida uu jirkoodu u qabo maaddooyin ay ka mid yihiin kaalsiyam, fiitamiin B12 iyo magneesiyam. Taa darteed ayey caanahu lagama maarmaan u yihiin dugsiga.

**Betra Strandberg**
Wakiilka Xoolodhaqatada Iswiidhan


J. Paulsson & J. Carlberg, Insändare. *Upsala Nya Tidning*. Publicerade 2014-11-04 och 2014-11-11. (Bearbetade)

# Su'aalaha "Warqadaha ku saabsan caano-cabka oo wargeys loo diray"

**Istallaab ku dhifo qaanadda ku aaddan jawaabta aad u aragto inay sax tahay.**
**<u>Hal</u> istallaab uun baa la oggol yahay.**

**1. Maxaa ugu wacan Strandberg aragtideeda ah iney caanuhu muhiim ugu yihiin carruurta dugsiga?**

A ☐ Caanahu waxey sababaan inay carruurtu cunto badan ka cunaan dugsiga.
B ☐ Caanahu waxey sababaan cimri-dheeri.
C ☐ Caanaha waxaa ku jira maaddooyin badan oo nafaqo leh.

**2. Maxaa ugu wacan Isfenson aragtidiisa ah inay carruurtu dugsiyada ka cabbaan biyo meeshii ay caano ka cabbi lahaayeen?**

A ☐ Biyuhu wey ka jaban yihiin caanaha.
B ☐ Biyaha ayaa caanaha uga wanaagsan bey'adda.
C ☐ Biyaha ayaa oon-baabi'inta uga wanaagsan caanaha.

**3. Maxaa lagu ogaaday cilmibaarista ay warqadahu ka hadlayaan?**

A ☐ Inuu caaano-cabku wanaag iyo xumaanba leeyahay.
B ☐ Inay cunnada lagu cuno dugsiyada leedahay nafaqo badan caanaha la'aantii.
C ☐ Inay caano-badsashadu keento adadkaanta lafaha.

**4. Maxay tahay sababta Strandberg ay wax ugu qoreyso wargeyska?**

A ☐ Waxay dooneysaa inay sharraxdo sababaha ay ula muuqato inuu Isfenson ku qaldan yahay.
B ☐ Waxay dooneysaa inay sharraxdo sababta biyahu ey bey'adda ugu wanaagsan yihiin.
C ☐ Ma dooneyso inay carruurtu cunno aad u yar ku cunaan dugsiga.

**Weerahee ayaa waafaqsan waxyaalaha ku qaran warqadaha ku saabsan caanaha?**
**<u>Hal</u> istallaab ah ku dhifo qaanadda ku aaddan Haa ama Maya ee weer walba dhammaadkeeda.**

| | | Haa | Maya |
|---|---|---|---|
| **5.** | Isfenson wuxuu leeyahay caano-cabka badani cimri-degdeg ayuu keenaa. | ☐ | ☐ |
| **6.** | Isfenson iyo Strandberg cilmibaarayaal isku mid ah ayey u cuskanayaan warqadahooda. | ☐ | ☐ |
| **7.** | Cilmibaareyaashu wey isku raacsan yihiin xagga waxtarka caanaha. | ☐ | ☐ |

**Su'aalahaan afka ayaad uga jawaabeysaa.**

8. Iskaaga si kooban ma uga sheekeyn kartaa wuxuu qoraalkaanu ku saabsan yahay?

9. Labada warqadood tee baa ku qancisay? Fikraddaada ma sharxi kartaa?

# Magaalooyinka adduunka oo xawli u sii kobcaya

Koboca baaxadaha magaalooyinka adduunka ayaa si xawli dhakhsa leh ku sii socda. Saadaasha QM waxaa ku cad in la filayo in dadka magaalooyinka ku nool ay isku dar ku kordhi doonaan 2,4 bilyan oo qof illaa iyo sannadka 2050-ka. Si haddaba dadku ay u helaan dhul ku filan waxaa laga yaabaa in magaalooyinku ay ku fidaan baaxad u dhiganta dalka Hindiya.

Qarnigii 19-aad ayey dadweynaha ku noolaa magaalooyinka adduunka ay tiradoodu iska beddeshay 220 milyan oo gaadhay 2,8 bilyan oo qof. 2008-dana waxay QM soo wariyeen in markii ugu horeysay ay dadka deggan magaalooyinka ay ka bateen kuwa deggan miyiga.


2013-kii waxaa guud ahaan dadweynaha magaalooyinka deggan tiradooda lagu qiyaasay 3,6 bilyan oo qof, hase ahaatee saadaasha QM waxay sheegaysaa in la filayo in tiradaasi gaari doonto 5 bilyan 2030-ka, islamarkaana kor u dhaafi doonto 6 bilyan sannadka 2050-ka. Waddammada Yurub, Waqooyi iyo Koonfur Ameerika ayey haddaba dadweynaha badankood ay ku nool yihiin magaalooyinka, halka Afrika iyo Aasiya ey qarka u saaran yihiin kobcid dhanka baahidda baaxadda magaalooyinka oo deg deg ku socota.

**Magaalooyinka kobcaya shar iyo khayrba wey leeyihiin**

Waxay la macne tahay in howlo culus oo hor leh ey horyaalaan kobaca magaalooyinka, maadaama uu kobocaasi dhaqsaha badan ey la socdaan dhibaatooyin caafimaad iyo kuwo bey'adeed intaba. Waxay tusaale ahaan ku saabsanaan karaan wasakhowga hawada iyo fayadhowr-xumada. Islamar ahaantaa koboca magaalooyinka waaweyn waxaa dad badan ay ku helayaan fursado aan miyiga ka jirin, sida daryeelka caafimaadka, fursadaha shaqada iyo kuwa waxbarashada.

In meel lagu soo uruuro waxay sidoo kale ka dhigan tahay in la yarayn karo baahida loo qabo tamarta iyo gaadiidka, taas oo iyadana gacan ka geysan karta yaraynta culeyska saaran cimilada.

**Isbeddelka tirada dadweynaha adduunka 1961-2012 iyo saadaasha 2013-2050**






J. Moström, *www.scb.se* (publicerad 2013-10-10)

# Su'aalaha "Magaalooyinka adduunka oo xawli u sii kobcaya"

**Istallaab ku dhufo qaanadda ku aaddan jawaabta aad u aragto inay sax tahay. Hal istallaab uun baa laguu oggol yahay.**

**1. Maxay tahay saameynta ugu xun ee ka imaaneysa dadka badan ee magaalooyinka u soo guura ee qoraalkaani uu ka hadlayo?**

A ☐ Bey'adda magaalooyinka oo xumaata.
B ☐ Magaalooyinka oo fida.
C ☐ Baahida gaadiidka loo qabo oo korodha.

**2. Qiyaastii tiro dad intee la eg ayaa loo maleynayaa inay ku noolaan doonaan magaalooyinka sannadka 2040-ka?**

A ☐ Qiyaastii 6,4 bilyan
B ☐ Qiyaastii 3,6 bilyan
C ☐ Qiyaastii 5,7 bilyan

**3. Maxay tahay sababta ugu weyn ee ugu wacan koboca tirada dadweynaha magaalooyinka ee qoraalkaani uu ka hadlayo?**

A ☐ Bey'adda magaalooyinka oo ka wanaagsan tan miyiga.
B ☐ Xaaladaha nololeed ee magaalooyinka oo ka wanaagsan tan miyiga.
C ☐ Ku dhex socodka magaalooyinka oo ka fudud tan miyiga.

**4. Sidee bey dadka adduunweynuhu ugu kala qeybsanaayeen magaalooyinka iyo miyiga 1961?**

A ☐ Qiyaastii labanlaab ayey ahayd tirada dadka deggan miyiga marka loo barbardhigo magaalooyinka.
B ☐ Dadka magaalooyinka deggan ayaa ka badnaa dadka miyiga.
C ☐ Wey isla ekaayeen tirada dadka deggaanaa magaalooinka iyo tirada dadka miyiga.

**Su'aalahaan afka ayaad uga jawaabeysaa.**

**5.** Iskaaga si kooban ma uga sheekeyn kartaa wuxuu qoraalkaanu ku saabsan yahay?

**6.** Qoraalka waxaa ku yaal in marba marka ka dambeysa ey sii badan doonaan dadka deggan magaalooyinka. Maxay kula tahay maxaa ka mid ah waxtarka uu yeelan karto in in taa baddelkeed lagu noolaado miyiga? Fikraddaada ma sharxi kartaa?

# Litteraturförteckning

Aisopos. Den girige. I: *Aisopos' fabler*. Ny översättning av Erik Hedén med illustrationer av Arthur Rackham. 1919. Stockholm: Svenska andelsförlaget. (bearbetad)

Aronsson, Karin & Stellan Ottosson, 1993. Lejonet och räven. I: K. Aronsson & S. Ottosson; illustrationer I-K Eriksson & M. Korotyńska, *Min läsebok Blå rosen*. 2:a uppl. Stockholm: Liber. (bearbetad)

Borgström, Håkan, 2010. Sover kroppen när du sover? I: H. Borgström. 2010. *Kroppens mysterier*. Enskede: Borgströms Förlag. (bearbetad)

Carlberg, Jonas, 2014. Mjölken behövs till skolmaten. *Upsala Nya tidning*. Insändare. Publicerad 2014-11-11. (bearbetad)

*En karta över en ö*. Kartan och frågorna anpassade från IEA Reading Literacy Study. © 1990. International Association for the Evaluation of Educational Achievement (IEA). The Hague: International Association for the Evaluation of Educational Achievement (IEA), IEA Secretariat[1].

Harrison, Dick, 2014. Hur länge har vi ätit potatischips? Historiebloggen. *Svenska Dagbladet* http://blog.svd.se/historia/2014/09/28/hur-lange-har-vi-atit-potatischips/?fromMobile=true Publicerad 2014-09-28. Hämtad 2014-10-19. (bearbetad)

Moström, Jerker, 2013. Världens städer växer allt snabbare. SCB. Statistiska centralbyrån. http://www.scb.se/sv_/Hitta-statistik/Artiklar/Varldens-stader-vaxer-allt-snabbare/# Publicerad 2013-10-10. Hämtad 2015-01-08. (utdrag)

Paulsson, Jonas, 2014. Ge barnen havremjölk i stället. *Upsala Nya Tidning*. Insändare. Publicerad 2014-11-04. (bearbetad)

Åström, Karin, 2001. Skorpionen – ett spindeldjur med gadd. I: S. Andersson, K. Åström & S. Rune. *Boken om världen*. Stockholm: Liber. (Utdrag)

# Bildförteckning

Lejonet och räven. Eriksson, Inga-Karin, 1993. I: K. Aronsson & S. Ottosson; illustrationer I-K Eriksson & M. Korotyńska, *Min läsebok Blå rosen*. 2. uppl. Stockholm: Liber.

Fotografi på skorpion. Hämtad 2015-06-24
https://upload.wikimedia.org/wikipedia/commons/6/6d/Emperor_scorpion_or_Imperial_scorpion_(Pandinus_imperator).jpg

Fotografi på potatischips. Hämtad 2015-02-03
https://pixabay.com/p-476359/?no_redirect

[1] Att IEAs skrifter, studiematerial och undersökningar med organisationens tillstånd får användas för forsknings- och utbildningsändamål ska inte tolkas som att IEA medverkat i eller godkänt någon del av forskningen, eller rapporteringen kring den, eller de utbildningsprogram vari materialet används.